# علو الهمة سبيل الأمم المتحضرة

## Himada sare waa waddada ummadaha ilbaxa ah

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa weyn ku yiri:

(سَابِقُوا إِلَى مَغْفِرَةٍ مِنْ رَبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا كَعَرْضِ السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ أُعِدَّتْ لِلَّذِينَ آمَنُوا بِاللَّهِ وَرُسُلِهِ ذَلِكَ فَضْلُ اللَّهِ يُؤْتِيهِ مَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ ذُو الْفَضْلِ الْعَظِيمِ)

**(U orotama Dambidhaafka Alle iyo Janno ballarkeedu yahay ballarka cirka iyo dhulka oo kale, loona darbay kuwa rumeeyay Alle iyo Rasuulkiisa, Arrintaasuna waa samafal Eebana wuxuu siin Ruuxuu doono, Eebana Fadligiisu waa wayn yahay)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Diinta islaamka oo wadata farriimaheeda sarreeya waxay ku boorrinaysaa himada sare iyo dadaalka iyo waxqabadka waxay reebaysaa wahsiga iyo caajiska iyo fasahaadinta, tanna waa wixii ay la yimaadeen risaalooyinka hore, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:

{أَمْ لَمْ يُنَبَّأْ بِمَا فِي صُحُفِ مُوسَى * وَإِبْرَاهِيمَ الَّذِي وَفَّى * أَلَّا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَى * وَأَنْ لَيْسَ لِلْإِنْسَانِ إِلَّا مَا سَعَى * وَأَنَّ سَعْيَهُ سَوْفَ يُرَى * ثُمَّ يُجْزَاهُ الْجَزَاءَ الْأَوْفَى}

(**Miyaan looga warramin (dadka) wixii ku yiillay Kitaabkii (Nabi Muuse) * Iyo kii (Nabi Ibraahim) ee oofiyay (wixii lafaray) * Inaan nafna dambi naf kale qaadaynin * Ruuxna wuxuusan camalfalin heleeynin * Camalkiisana la arki doono * Ka dibna looga abaalmarin doono si buuxda**).

Wuxuu ku caddeeyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - qiimaha himada sare oraahdiisa:

(**إِنَّ اللَّهَ كَرِيمٌ يُحِبُّ الْكَرَمَ ، وَمَعَالِيَ الْأَخْلَاقِ ، وَيُبْغِضُ سَفْسَافَهَا**)

(**Alle waa deeqsi deeqsinimadana wuu jecel yahay iyo akhlaaqda sarsare wuxuuna nacayaa midda liidata**), wuxuu yiri sayidkeena Cumar bin Alkhabaab -Ilaahay raalli haka noqdee -: himadiina yaysan yaraanin, ma arkin waxa ka haritaan badan sharafta hima yarida"

Waxaa la yiri: astaamaha caqliga dhammaystiran waxaa ka mid ah himada sare, maxaa ka fiican oraahda Abu diib almutanabi"

وَلم أرَ في عُيُوبِ النّاسِ شَيْئاً ** كَنَقصِ القادِرِينَ على التّمَامِ

**ma arag ceebta dadka wax la mid ah * nuuqusnimada kuwa awoodda u leh dhammaystirnaanta**

Himada sare kuma koobna hal meel waxaa habboon inay ku jirto nolosha aadanaha waxaa ka mid ah:

Cibaadada: sharciga sharafta badan wuxuu ku boorriyay in loo degdego cibaadada, wuxuu leeyahay Alle:

{وَسارِعُوا إِلى مَغْفِرَةٍ مِنْ رَبِّكُمْ وَجَنَّةٍ عَرْضُهَا السَّماواتُ وَالْأَرْضُ أُعِدَّتْ لِلْمُتَّقِينَ}

(**Una deg daga Dambi dhaafka rabbigiina iyo Janno Ballaarkeedu yahay cirarka iyo Dhulka oo loo darbay kuwa dhawrsada**).

Wuxuu u damaanaqaaday Allaha xaqa ah mahad ballaaaran qofka ku dadaalo cibaadadiisa, wuxuu yiri Alle subxaanahu:

{وَمَنْ أَرَادَ الْآخِرَةَ وَسَعَى لَهَا سَعْيَهَا وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَأُولَئِكَ كَانَ سَعْيُهُمْ مَشْكُورًا}

(**Ciddiise Doonta Aakhiro oo u fala camalkeedii isagoo Mu'min ah kuwaas Camalkoodu wuxuu Noqon mid la Mahdiyo**).

Nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu ahaa mid leh himo sarreysa noloshiiisa oo dhan waxaa ka mid ah cibaadadiisa, rabbigiisa ayaa la hadlay asoo ku leh:

**{يَا أَيُّهَا الْمُزَّمِّلُ * قُمِ اللَّيْلَ إِلَّا قَلِيلًا * نِصْفَهُ أَوِ انْقُصْ مِنْهُ قَلِيلًا * أَوْ زِدْ عَلَيْهِ وَرَتِّلِ الْقُرْآنَ تَرْتِيلًا * إِنَّا سَنُلْقِي عَلَيْكَ قَوْلًا ثَقِيلًا}**

**( kan Isduuduubayow * Istaag habeenka (Tuko) wax yar Mooyee * Nuskiisa tuko ama ka nusqaami wax yar * Ama ka badi, Quraanku u akhri si fiican * Annagaa Kugu Dajin Hadal Culus (wayne)**)

Nabiga wuxuu soo toosi jiray habeenkii ilaa cagihiisa ay ka bararaan marka la weyddiiyayna arrinkaas wuxuu yiri:

**(أَفَلاَ أَكُونَ عبْداً شكُورًا؟)**

(**Miyaanan noqonaynin addoon mahad badan**).

Maxaa ka badan inuu ku boorrinayay asxaabtiisa iyo umaddiisa soocnaanta iyo himada sare, wuxuu leeyahay:

**(فَإِذَا سَأَلْتُمُ اللَّهَ فَسَلُوهُ الفِرْدَوْسَ ؛ فَإِنَّهُ أَوْسَطُ الجَنَّةِ ، وَأَعْلَى الجَنَّةِ ، وَفَوْقَهُ عَرْشُ الرَّحْمَنِ ، وَمِنْهُ تَفَجَّرُ أَنْهَارُ الجَنَّةِ)**

(**Haddaad Alle weyddiinaysaan weyddiista Fardows, waa jannada ugu fiican uguna sarreysa waxaa korkeeda ah carshiga raxmaanka, waxaana kasoo burqada webiyada**).

Waxaa laga wariyay rabiica bin kacab -Ilaahay raalli haka noqdee -, wuxuu yiri: waxaan la seexan jiray rasuulka Alle, waxaan u keenay weysadiisa iyo dantiisa wuxuu igu yiri: weyddii waxaan ku iri: waxaan rabaa jannada inaan kula saaxiibo, wuxuu yiri: (**waxaas waxan ahayn miyaa?**) waxaan iri: waa saas: wuxuu yiri: (**igu keelmee sujuud badan**).

Himada sare cibaadada waxay keenaysaa in si fiican loo guto, inay ka muuqato dhaqanka qofka iyo akhlaaqdiisa, been ma sheegayo wax ma khiyaanayo wax ma qishayo, dadka hantidooda kuma cunayo baadil, gudashada cibaadada wuxuu waafaqsan yahay ujeeddada laga leeyahay, waxaa la helayaa tuusnaanta oo ah asaaska diintan toosan.

Waxa ugu muhimsan goobaha himada sare: aqoonta, wuxuu na amray nabiga inaan Alle weyddiino cilmi waxtar leh oo dadka ay faa'ido ka helayaan, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(سَلُوا اللَّهَ عِلْمًا نَافِعًا ، وَتَعَوَّذُوا بِاللَّهِ مِنْ عِلْمٍ لَا يَنْفَعُ)**

(**Weyddiiya Alle cilmi waxtar leh, kana magangala cilmi aan waxtaraynin**)

Ducadiisa waxaa ka mid ahayd:

(اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنْ عِلْمٍ لاَ يَنْفَعُ... )

(**Ilaahayow waxaan kaa magangalayaa cilmi aan wax taraynin**).

Cilmiga waxtarka leh waa hubka dhabta ah oo ay dowladaha awoodda ka helaan oo ay ummadaha ku hormaraan, dowlad waxaan aqoon ahayn kuma hormarto, sidoo kale waxaan wahsi ahaynna kuma dibdhacdo.

Asxaabta iyo taabiciinta (raalliga Alle korkooda ha ahaadee) waxay ahaayeen kuwa dadka ugu himad badan, waa kanaa Abuu Hureyra -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu ahaa mid himad sare ku leh raadinta xadiiska wuxuu dhihi jiray: igama mashquulin jirin rasuulka Alle beeridda togga iyo gorgortanka suuqa nabiga waxaan ka dooni jiray kalmad uu i barayo...), wuxuu yiri Ibnu Cumar -Ilaahay raalli haka noqdee -: Abuu Hureyrow waxaad ahayd midka noogu laasimid badan rasuulka oo noogu aqoon badan xadiiskiisa, wuxuu dhihi jiray sayidkeena Cabdullaahi bin Cabbaas-Ilaahay raalli haka noqdee -: xadiiska ayaa iga soo gaari jiray nin markaas ayaan u tagi jiray asoo hargal ku jira go'ayga ayaan ku barkan jiray albaabkiisa hortiisa, dabaysha ayaa wejiga iga habaasayn jirtay wuxuu soo baxaa wuu i arkaa wuxuu oranayaa: rasuulka ina adeerkiisow maxaa ku keenay? maxaad iigu soo diri weysay si aan kugu imaado? waxaan dhahaa: anaa

mudan inaan kuu imaado xadiiska ayaan weyddiinayay) wuxuu yiri Ismaaciil bin Yaxya: waxaan maqlay Shaafici oo oranaya: waxaan xifdiyay quraanka anoo toddoba jir ah muwada'ana waxaan xifdiyay anoo toban jir ah, Imaam Axmed wuxuu xafidsanaa malyuun xadiis, waxaa la yiri: imaam Nawawi wuxuu xaadiri jiray maalintii labo iyo toban cashar.

Sidey ugu dadaaleen culimadeenii hore xambaaridda amaanada aqoonta dhinac walba oo ayna dadka u gaarsiiyeen si daacad ah iyagoo Alle raalligalinaya dadkana wax u taraya, magacyadooda ayay kaga qoreen taarikhda xuruuf iftiin ah, wuxuu yiri Alle:

{فَأَمَّا الزَّبَدُ فَيَذْهَبُ جُفَاءً وَأَمَّا مَا يَنفَعُ النَّاسَ فَيَمْكُثُ فِي الْأَرْضِ}

(**Xumbaduse way tagi iyadoo ingagan waxa dadka anficise wuxuu ku nagaan dhulka**).

Waxaa ka mid ah goobaha himada sare: shaqada, shareecada islaamka waxay kor u qaadday shaqada qiimaheedana way sarraysiisay, quraanka kariimkana wuxuu isku xiray cibaadada iyo shaqada, wuxuu ka dhigay kuwa isla socda, wuxuu leeyahay Alle:

{فَإِذَا قُضِيَتِ الصَّلَاةُ فَانتَشِرُوا فِي الْأَرْضِ وَابْتَغُوا مِن فَضْلِ اللَّهِ وَاذْكُرُوا اللَّهَ كَثِيراً لَّعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ}

(**Markase salaadda la dhammeeyo dhulka ku kala faafa, dalbana (doona) khayrka Alle, Ilaahayna xusa in badan waxaad u dhawdihiin inaad liibaantaan**)

Ilaahay wuxuu u yaboohay qofka hagaajiyo camalkiisa nolol fiican adduunka aakhirana namco joogto ah wuxuu yiri:

{مَنْ عَمِلَ صَالِحًا مِّن ذَكَرٍ أَوْ أُنثَى وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَنُحْيِيَنَّهُ حَيَاةً طَيِّبَةً وَلَنَجْزِيَنَّهُمْ أَجْرَهُم بِأَحْسَنِ مَا كَانُواْ يَعْمَلُونَ}

**(Ciddii camal fasha wanaag oo Raga ama haweena isagoo mu'mina waxaan noolaynaynaa Nolol wanaagsan, waxaana ku abaal marinaynaa Ajirkooda waxa ugu Wanaagsan ee ay falayeen)**

Wuxuu yiri:

{إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ كَانَتْ لَهُمْ جَنَّاتُ الْفِرْدَوْسِ نُزُلاً}

(**Kuwa rumeeyay (xaqa) oo fala camal fiican waxay u ahaatay jannada firdowso degid, (martiqaad)**)

Ma jiro waxa kaga daliil abadan sharafta camalka in dhamaan anbiyada ay shaqayn jireen Aadam iyo Ibraahim iyo Luud beerralay ayay ahaayeen, Nuux wuxuu ahaa faryaame, Idriis wuxuu ahaa Harqaanle, Saalix wuxuu ahaa ganacsade, Daawuud wuxuu ahaa birtume, wuxuu yiri Alle:

{وَلَقَدْ آتَيْنَا دَاوُودَ مِنَّا فَضْلًا يَا جِبَالُ أَوِّبِي مَعَهُ وَالطَّيْرَ وَأَلَنَّا لَهُ الْحَدِيدَ * أَنِ اعْمَلْ سَابِغَاتٍ وَقَدِّرْ فِي السَّرْدِ وَاعْمَلُوا صَالِحًا إِنِّي بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ}

(**Dhab ahaan baan u siinay Nabi Daawuud fadli xaganaga ka ah, waxaana niri buurahow la tasbiixsada isagoo shimbiraha la wadaan, waxaana u jilcinay birta**

*** Waxaana ku niri ka samee cambuurbireed sugna tixidda wanaagna fala, waxaad faleeysaanna waan arkaa**)

Qofka qiimihiisa wuu sarreynayaa sharaf ayuu ku helayaa wuxuu garanayo, shaqada waxay ka khayr badan tahay tuugsiga, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(لَأَنْ يَحْتَطِبَ أَحَدُكُمْ حُزْمَةً عَلَى ظَهْرِهِ، خَيْرٌ لَهُ مِنْ أَنْ يَسْأَلَ أَحَدًا ، فَيُعْطِيَهُ ، أَوْ يَمْنَعَهُ)**

(**Inuu midkiina qoryo dhabarkiisa kusoo gurto ayaa ugu khayr badan inuu qof wax weyddiiyo ha siiyo ama ha u diido**)

Loolama jeedo shaqo kaliya waxaa loola jeedaa sugidda shaqada, wuxuu leeyahay nabigeena:

**(إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ إِذَا عَمِلَ أَحَدُكُمْ عَمَلا أَنْ يُتْقِنَهُ)**

(**Wuxuu jecel yahay Alle midkiina hadduu camalfalo inuu sugo**).

Wuxuu ahaa nabiga mid aad ugu dadaala qof kaste inuu u sugnaado camal wanaagsan naftiisa iyo dadka kale wax ugu tarayo, wuxuu leeyahay rasuulka:

**(عَلَى كُلِّ مُسْلِمٍ صَدَقَةٌ) ، فَقَالُوا : يَا نَبِيَّ اللَّهِ ، فَمَنْ لَمْ يَجِدْ ؟ قَالَ : (يَعْمَلُ بِيَدِهِ ، فَيَنْفَعُ نَفْسَهُ وَيَتَصَدَّقُ) ، قَالُوا : فَإِنْ لَمْ يَجِدْ ؟ قَالَ :**

(يُعِينُ ذَا الحَاجَةِ المَلْهُوفَ) ، قَالُوا : فَإِنْ لَمْ يَجِدْ ؟ قَالَ : (فَلْيَعْمَلْ بِالْمَعْرُوفِ ، وَلْيُمْسِكْ عَنِ الشَّرِّ ، فَإِنَّهَا لَهُ صَدَقَةٌ)

(**Qof kaste muslin ah sadaqo ayaa laga rabaa**), waxay dhaheen: Nabigii allow qofkaan helin? Wuxuu yiri: (**gacantiisa ayuu ku shaqaysanayaa naftiisa ayuuna anfacayaa wax buuna sadaqaysanayaa**) waxay dhaheen: hadduusan helin? Wuxuu yiri: (**wuxuu u kaalmaynayaa midka baahan oo dhibban**) waxay dhaheen: hadduusan helin? wuxuu yiri: (**wanaag ha sameeyo shartana haka haro sadaqay u tahay**)

Wuxuu ku booriyay qofka aan wax qaban karin inuu iska daayo dhibka dadka, taasna wuxuu ka dhigay camal uu ajar ka helayo, maxaayeelay dadka ayuu ka reebay shartiisa iyo dhibkiisa.

Waxaa ka mid ah darajooyinka ugu sarreeya himada: himada adeegga bulshada iyo kaalmada dadka taagdarran, u gargaariida qof dhibban, dadka baahan in wax loo qabto iyo gurmad iyo dadnimo, nin ayaa u yimid rasuulka wuxuu yiri: rasuulkii allow dadka kee loogu jecel yahay Alle xaggii? camal kee loogu jecel yahay Alle xaggii -cazza wajalla=? wuxuu yiri rasuulka:

(أَحَبُّ النَّاسِ إِلَى اللَّهِ أَنْفَعُهُمْ لِلنَّاسِ ، وَأَحَبُّ الْأَعْمَالِ إِلَى اللَّهِ سُرُورٍ تُدْخِلُهُ عَلَى مُسْلِمٍ ، أَوْ تَكْشِفُ عَنْهُ كُرْبَةً ، أَوْ تَقْضِي عَنْهُ دِينًا ، أَوْ تطردُ عَنْهُ جُوعًا ، وَلِأَنْ أَمْشِيَ مَعَ أَخٍ لِي فِي حَاجَةٍ أَحَبُّ إِلَيَّ مِنْ أَنْ أَعْتَكِفَ فِي هَذَا الْمَسْجِدِ – يَعْنِي مَسْجِدَ الْمَدِينَةِ – شَهْرًا ، وَمَنْ كَفَّ غَضَبَهُ سَتَرَ اللَّهُ عَوْرَتَهُ ، وَمَنْ كَظَمَ غَيْظَهُ ، وَلَوْ شَاءَ أَنْ يُمْضِيَهُ أَمْضَاهُ ، مَلَأَ اللَّهُ (عَزَّ وَجَلَّ) قَلْبَهُ أَمْنًا يَوْمَ الْقِيَامَةِ ، وَمَنْ مَشَى مَعَ أَخِيهِ فِي حَاجَةٍ حَتَّى أَثْبَتَهَا لَهُ أَثْبَتَ اللَّهُ (عَزَّ وَجَلَّ) قَدَمَهُ عَلَى الصِّرَاطِ يَوْمَ تَزِلُّ فِيهِ الْأَقْدَامُ) .

**(Dadka waxaa loogu jecel yahay xagga Alle kuwa ugu dadka anafac badan, camalna waxaa loogu jecel yahay Alle agtii qof muslin aad farxad galinayso, ama aad kurbo ka feydayso, ama aad deyn ka gudayso, ama aad gaajo ka eryinayso, inaan ula socdo walaalkayga dantiisa ayaa loogu jecel yahay inaan masjidkan bil ku ictikaafo - wuxuu ka wadaa msajidkiisa-, qofkii caradiisa celiyo Alle ayaa cawradiisa asturaya qofkii cabburiyo ciilkiisa hadduu rabi lahaa inuu fuliyo fulin karo Alle ayaa ka buuxinaya xabadkiisa amni maalinta qiyaame, qofkii ula socdo walaalkiisa dan ilaa uu u xasiliyo Alle ayaa ku sugaya cagtiisa siraadka maalinta ay ku sanbariiraxdaan cagaha).**

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago, waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta

**Walaalaha islaamka ahow:**

Goobaha ugu weyn oo ay habboon tahay inaan ku tartanno dhamaanteena iyo inaan noqono dad himo sare leh waxaa ka mid ah: adeegga dalka, wuxuu ka mid yahay adeegga dalka iimaanka, wuxuu na amray Alle inaan ku tartanno goobaha khayrka iyo waxtarka dalka kusoo noqonaya, wuxuu leeyahay Alle subxaanahu:
{فَاسْتَبِقُوا الْخَيْرَاتِ إِلَى اللَّهِ مَرْجِعُكُمْ جَمِيعًا فَيُنَبِّئُكُمْ بِمَا كُنْتُمْ فِيهِ تَخْتَلِفُونَ}،

(**Ee u oratama Wanaaga, meelkastood ahaataana Eebe wuu idin keeni (oo idin kulmin) dhammaantiin, Eebana wax walba wuu karaa (haduu doono),**)

Wuxuu ammaanay Alle adoomihiisa oo wanaagga dadka kula degdega, wuxuu caddeynayaa wanaaggaas inuu qofkiisa anfacayo adduun iyo aakhiro, wuxuu leeyahay Alle:

{إِنَّهُمْ كانُوا يُسارِعُونَ فِي الْخَيْراتِ وَيَدْعُونَنا رَغَباً وَرَهَبًا وَكانُوا لَنا خاشِعِينَ}

(**Waxayna ahaayeen kuwo u degdega khayaadka oo Na barya iyagoo rajayn oo cabsan waxayna ahaayeen kuwa noo khusuuca**).

Himo sare iyo in la jeclaado waxtarka dadka iyo kalsooni buuxda xagga fadliga Allaha sare iyo tawfiiqdiisa.

Himada sare waxaa ka mid ah: himada dhismaha dalka iyo xambaaridda mas'uuliyadda bulshada iyo ku tartanka camalka wanaagsan dayactirka masaajidda iyo dhismaha dugsiyada iyo qalabaynta isbitaallada iyo daaweynta bukaanka, waxaasoo dhan wuxuu ka mid yahay sadaqa soconaysa, wuxuu leeyahay nabigeena:

**(سَبْعٌ يَجْرِي لِلْعَبْدِ أَجْرُهُنَّ مِنْ بَعْدِ مَوْتِهِ ، وهُو فِي قَبْرِهِ : مَنْ عَلَّمَ عِلْمًا ، أَوْ كَرَى نَهْرًا ، أَوْ حفَرَ بِئْرًا ، أَوْ غرَسَ نَخْلا ، أَوْ بَنَى مَسْجِدًا ، أَوْ وَرَّثَ مُصْحَفًا، أَوْ تَرَكَ وَلَدًا يَسْتَغْفِرُ لَهُ بَعْدَ مَوْتِهِ)**

(**Toddoba ajarkooda addoonka waa u soconaa geeridiisa kaddib asoo qabrigiisa ku jira: qofkii aqoon dadka bara ama webi kireeya, ama ceel qoda, ama timir tilaala ama masjid dhisa ama musxaf dhaxalsiiya ama wiil u dambidhaafaya ka taga geeridiisa kaddib**)

Maxaa ka qurxoon inaan ku tartanno adeegga dalka oo dhamaanteena aan ku sugan nahay khayrkiisa iyo fadligiisa oo u noqonaya dhammaan dadkiisa, taas waxaan ku xaqiijinaynaa iskaashi iyo midnimo iyo wacyi iyo isu naxariisasho iyo in loo kaalmeeyo dhammaan, wadanka annagoo dhan ayaa iska leh dhamaanteena ayuu nala hormaraa, ma nihi kuwa ka yar dadka kale xagga awoodda iyo doonista iyo dadaalka, waxaannu nahay dad xadaaro leh iyo asal iyo taariikh, waxaa lagama maarmaan ah sarreynta iyo tartanka inay u baahan yihiin in la jiiro dhibka iyo shidada, iyo inkiraadda anaaniyada, sharafta dhib ayaa ku hareersan, wanaaggana laguma gaaro waxaan dadaal ahayn iyo dhib, maxaa ka fiican Abuu Tammaam oraahdiisa:

**بصُرْتَ بالرَّاحة الكُبرى فلمْ ترها * تُنالُ إلاَّ على جسرٍ منَ التَّعبِ**

**Waxaad aragtay raaxada weyn maadan u arkin * in lagu gaaro buundo daal mooyee**

**Ilaahayow nagu arsaaq himooyin sarsare oo aan ku helno reyn iyo fadli iyo hormar iyo korreyn wixii wax**

**noo taraya adduun iyo aakhiraba, noo ilaali diinteena iyo dalkeena iyo dhammaan dalalka caalamka.**